



Orientation to Ontario

ILAALINTA BII'ADA

Haku daadin qashinka wadada! – Dhammaan dadka reer Ontario waa inay ka wada shaqeeyaan nadaafada biyaha iyo dhulka Ontario. Qashin daadintu waa marka aad qashin uga tagto dhulka, gudaha magaallada ama banaanka meelaha baadiyaha. Ku tuurista qashin harooyinka iyo wabiyada ayaa sidoo kale ah wasaqaynta wadanka.

MAARAYNTA QASHINKA

Qashinka Xaafada

Maamullada kaladuwan ee magaalooyinka ayaa u mareeya qashinka xaafadaha qaabab kaladuwan. Qaar kamid ah dawladaha hoose ayaa qarash ku qaada uruurinta qashinka waxayna dadka siiyaan qasacyada gaarka ah ee qashinka, alaabta warshada lagu cesho iyo qashinka agabka adag. Qashinku waa wasaq aan dib loo warshadayn karin ama la gubi karin. Inta badan deegaannada ayaa leh barnaamijka Blue Box oo lagu shubo waraaqaha, dhalooyinka, caagaga, almuuniyaamka iyo agabka kale ee dib loo warshadeeyo. Agabka dib loo warshadeeyo ayaa loo adeegsadaa samaynta alaabo cusub.

Barnaamijyada Green Bin ayaa uruuriya qashinka cuntada sida miraha iyo khudaarta qashinka ah, hilibka iyo bunka oo laga sooco qashinka caadiga ah.

Qashinka oorganiga ah ayaa loo badelaa bacrimin, taasoo loo adeegsado hormarinta ciida beeraha raaxada iyo dhul beereedka.

Si aad u hesho Blue Box, ama aad u hesho haddii aagaagu leeyahay barnaamijka Green Bin, la xariira dawladaada hoose.

Booqo Wasaarada Arrimaha Magaalda iyo Guryaha oo aad ka helayso ontario.ca ama

findlink.at/muniseroff

Sharciga Difaaca Bii'ada ayaa sheegaaya in dib u warshadayntu ay qasab ku tahay dhismeyaasha la dagan yahay ee leh lix guri ama ka badan. Haddii aad qayb ka dagan tahay dabaq, waydii kormeerahaaga sida aad dib u warshadayn u samayn karto. Bulshooyinka qaarkood ayaa sidoo kale lahaan kara barnaamijyada qashin gubista ee xaafadaha dabaqyada ah.

Agabka elektarooniga ah

Qashinka elektarooniga ah waxaa ku agabka sida kaamirada, kumbuyuutarada, shaashadaha waawayn, taleefannada, iyo taleefishinnada aan qofna rabin ama u baahnayn. Agabkaan waa in lagu ridaa qasaca qashinka dib loo warshadeeyo ee gaarka ah. Marka aad agab elektaroonig ah ka iibsato Ontario, waxaad dhiibaysaa qarashka maamulka bii'ada (EHF). Lacagtaan ayaa loo adeegsadaa bixinta qarashka dib u warshadaynta ama dayactirka qalabka korontada.

Booqo recycleyourelectronics.ca si aad u hesho meesha lagu rido qalabka elektarooniga ah oo kuu dhow.

ILAALINTA TAMARTA IYO BIYAHA

Samaynta koronto ayaa saamayn xun ku leh bii'ada. Ilaalinta tamarta ayaa sidoo kale kaydisa lacagta.

Si aad xog badan uga ogaato ilaalinta tamarta, booqo Wasaarada Tamarta oo aad ka helayso energy.gov.on.ca ama findlink.at/savinenergy

Booqo webseedka Laanta Khayraadka Dabiiciga ah ee Xafiiska Tashiilida Tamarta ee Canada oee.nrcan.gc.ca

Funded by / Financé par :



Immigration, Refugees and Citizenship Canada

Immigration, Réfugiés et Citoyenneté Canada

1-855-626-0002
<https://orientationontario.ca>



Biyaha la cabo ee amaan ah, nadiifta ah waa inaan la wasaqayn. La xariir dawladaada hoose si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan iaalinta biyaha.

Booqo Wasaarada Arimaha Magaalda iyo Guryaha oo aad ka helayso ontario.ca ama findlink.at/muniseroff

Si aad xog dheeri ah uga ogaato barnaamijyada dib u warshadaynta ee Ontario, booqo Stewardship Ontario oo aad ka helayso stewardshipontario.ca

OGEYSIIS MUHIIM AH

- Haku daadin qashinka wadada
- Yaree, dib u isticmaal, warshada ku celi
- Gub ama isticmaal Qasaca Cagaaran



MA OTAHAY?

Waxaa lagugu ganaaxi karaa ilaa \$1,000 haddii aad qashin ku daadiso Ontario. Haddii aad qashin ku tuurto jidwaynaha, booliiska ayaa joojin kara gaarigaaga kadibna ku siin kara tigidh ganaax ah.

